Pneumococci

Yaa laga tallaali karaa bakteeriyada Pneumococci?



- 65 sano jirka ah ama da`dooda ka wayn.
- Dadka waaweyn oo da'dooda u dhaxayso 18 ilaa 64 sano jirro oo qaba cudur halis ah

Haddii aadan hubin haddii aad u baahan tahay tallaal iyo in kale kala xiriir dhakhtarkaaga. **Haddii sannadkaan aad 65 sano buuxsan doonto, waxaad ku heli doontaa tallaalka qiimo jaban.**

Sidee buu tallaalka pneumococci u shaqeeya?

- Maadadda tallaalka waxay jirka bartaa sidii bakteeriyada Pneumococci isaga difaaci lahayd.
- Maadadda tallaalka irbad ahaan ayaa cududa sare. Waxaa lagu tallaali karaa islamaalinta laga tallaali doono cudurka corona iyo hargabka sannadlaha ah.
- Waxtarka maadadda tallaalka waxay bilaabataa 1 ilaa 2 toddobaad gudahooda.

Tallaalka kadib maxaa dhici doono?

- Dadka intooda badan waxay xannuun yar ka dareemaan meesha la duray, waxaana laga yaabaa in inyar casaan noqoto oo soo bararto.
- Qaar kalena waxay dareemaan qandho, murqo-xannuun, waxay dareemaan oo kale jirro yar ama daal. Calaamadahaas dhowr maalmood ka dib way cirib-tirmaan.
- Haddii aadan hubin in calaamadaha aynan u sabab ahayb tallaalka iyo in kale kala xiriirtaa dhakhtarkaaga.

Warbixin faahfaahsan ka akhriso barta intertka
fhi.no/voksenvaksinasjon

FHI